

**SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA
J F HOBYO MAAL LTD**



**XEERKA DHISMAHA SHIRKADDA ADEEGA GANACSIGA GUUD IYO
MAALGASHIGA, DEKEDAHA**

Mogadishu-Somali


2023

MASAWIRADA MILKIILAYAASHA SHIRKADDA


ABDULLAHI SAID SALAD (A. JIIS)




ELMI MOHAMED BAALE




QOJE MOHAMED QAYLIE



AHMED HASSAN GULED



ABDULLAHI MOHAMED DAAHIR



UJEDDO: DHISMO SHIRKADA ADEEGA GANACSIGA GUUD IYO MAALGASHIGA DEKEDAHA LAGUNA MAGACAABO J F HOBYO MAAL LTD.

Manta oo ay taariikhdu tahay 18/12/2023 Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed “Max’ed Notaayo”**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxay Mudanayaasha Soomaaliyeed ee hoos ku Xusan iga Codsadeen in aan u Qoro Warqada Dhisida Sharci Shirkadeed, Shirkadaas oo Lagu Magacaabo “J F HOBYO MAAL LTD” Waana Sidatan :-

1. Abdulahi Said Salad, Sita Somali Pass.l.r.P01004724 “Ahna Gudoomiye”
2. Elmi Mohamed Baalle, Sita Somali Pass.l.r.P01100675 “Ahna Gudoomiye Ku Xigeen”
3. Qoje Mohamud Qeyliye Sita Somali Pass.l.r.P01114804 “Ahna Xubin”
4. Ahmed Hassan Guled Sita Somali Pass.l.r.P01132549 “Ahna Xubin”
5. Abdullahi Mohamed Dahir (Seed) Sita Somali Pass.l.r.P00845521 “Ahna Maamulaha Shirkadda”

sidaas danted waxaanu ku heshiinay in wax alaale wixii hanti, faa’ido iyo qarash ah oo ay samayso shirkadu aanu ku qaybsano si waafaqsan shareecada Islamka iyo si ku salaysan saaami ahaan wixii qof walbe hanti ahaan uu shirkadda ku darsaday. Ayadoo loo cuskanayo qodobada hoose ee aanu kuwada heshiinay.

Qodobka 1’aad

MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA

MAGACA SHIRKADDA WAA:- (**J F HOBYO MAAL LTD**) oo leh mas’uuliyad xaddidan, shaqadeeduna tahay bixinta iyo hormarinta adeegyada Guud iyo MAALGASHIGA Dekedaha nooc kaste oo ay yihiin oo ay bulshada Soomaaliyeed u baahan tahay.



Qodobka 2’aad

WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA

Shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waxaa la’aasaasay 02/03/2022, waxaana lagu aasaasay magaalada Mogadishu ee ah caasimada Jamuuriyadda Faderaalka Soomaaliya.

Qodobka 3’aad

NOOCA SHIRKADDA

Nooca iyo Hantida Shirkadda waxay ku dhisan tahay saami xadidan, (LIMITED LIABILITY) taas oo ah Saami kaste waxaa uu mas’uul iyo damaanad ka noqonkaraa qadar le, eg ama ka yar hantida ugu jirta shirkadda, Maamulaha ayaana iska leh awooda shaqo howledka shirkadda.

Qodobka 4’aad

SALDHIGA IYO XARUNTA SHIRKADDA

Shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waxaa xarun iyo saldhig u ah magaalada Mogadishu, caasimada Jamuurida Faderaalka ee Soomaaliya, degmada Hodan, gaar ahaan xafada benadir waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dhamaan dalka gudahiisa iyo dibadiisaba.

Qobodka 5'aad

UJEEDOOYINKA LOO AASAASAY SHIRKADDA

1. Bixinta iyo hormarinta adeegyada Guud iyo Maalgashiga Dekedaha ee bulshada Soomaaliyeed ay u baahan yihiin.
2. Ku baraarujinta bulsahda qiimaha iyo waxtarka caafimaad ahaan ay nadaafadu u leeyahay hab nololeedka bili'aadamka.
3. Bixinta adeega kala iibsiga guud iyo maalgashiga Dekedaha noocyadooda kala duwan.
4. Ka faa'idaysiga technology-da cusub ee hormarinta adeega guud iyo Dekedaha.

Qobodka 6'aad

HANTIDA IYO RAASAMAALKA SHIRKADDA J F HOBYO MAAL LTD

Hantida shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waa lacag dhan USD \$3,000,000 (Sadex Milyan oo Dollarka Marekanka ah) oo u ka kooban 3,000 Saami oo qiimiha Saamigii yahay USD 1,000 (Kun Doolarka Mareykanka ah) oo lawada leeyaay:-

MAGACA	LACGTA	BOQOLEY
ABDULAHI SAID SALAD	\$850,000	28.33%
ELMI MOHAMED BAALLE	\$650,000	21.66%
QOJE MOHAMUD QEYLIYE	\$500,000	16.67%
AHMED HASSAN GULED	\$500,000	16.67%
ABDULLAHI MOHAMED DAHIR	\$500,000	16.67%
GUUD:-	\$3,000,000	100.00%

Qodobka 7'aad

SHARES-KA SHIRKADDA

Saamiga shirkadda iyo awooda Saamilaha J F HOBYO MAAL LTD waxay ka koobanyihiin 2,000 oo Saami oo magacaaban, waxaa looga mid noqon kara sida ku cad qodobada hoose.

1. Saamile kaste ee ka mid ah shirkadda J F HOBYO MAAL LTD wuxuu leeyahay hal cod.
2. Hantida shirkadda waa la kordhin karaa hadii ay isku raacaan xubnaha Saamilayda shirkadda 3/5.
3. J F HOBYO MAAL LTD waxaa Lagu Maal gashan karaa ugu yaraan 5 Saami oo qiimaha Saamigii yahay \$1,000 una dhiganta (\$5,000) iyo wixii kabadan hadii ay ogolaadaa 3/5 Saamilayda shirkadda.

Qodobka 8'aad

XUQUUQDA XUBNAHA SHARE-DA SHIRKADDA.

Saamile kaste waxaa uu xaq u leeyahay sida ku xusan qodobada hoose:-

1. In uu helo warbixin ku saabsan hawlaha shirkadda lixdii biloodba hal mar.
2. In loo soo gudbiyo faa'iido iyo khasaare wixii ka dhashay hawlshaheedkii 12 bilood ee sanada dhamaad kaste.

3. In loo sheego marka la iibinayo ama la kordhinayo Saamiga shirkadda shirna la iskugu yeero.
4. Saamile-ha wuxuu shaqaale ka noqon karaa shirkadda haddii uu buuxiyo shuruudaha laga rabo booska banaan markaas.
5. Waa in uu helaa cadayn ama shahaado muujinaysa Saamiga uu ku leeyahay shirkadda iyo qiimaha uu marayo.
6. Wuxuu Saamiluhu qaadan karaa ama la bixi karaa Saamigiisa uu ku leeyahay shirkadda marka la sameeyo xisaab xirka sanadka iyo ogolaansho Maamulka guud ee Shirkadda.

Qodobka 9'aad

GADASHADA SAAMIGA SHIRKADDA

Saamile kaste waxaa uu xaq u leeyahay in uu gato Saamigiisa marka uu rabo waana inuu ugu horayn u gudbiyaa Maamulka Shirkadda iyadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo mudo 90 maalmood ah wuxuu u madax banaan yahay in uu cidduu doono ka gato, waana in loo diiwaan galiyaa cida haysata shahaada shirciga ah.

Qodobka 10'aad

QAADASHADA FAA'IDADA IYO KHASAARAHA

Faa'idada iyo Khasaaraha Shirkadda waxaa loo qaybsanayaa sida hoos ku cad:-

1. Waxay ku xadidan tahay qof kaste inta Saami ee uu leeyahay waxaana la qaybinayaa markuu dhamaado xisaab xir kasta ka dib.
2. Faa'idada la helay haddii ay tahay 5% waxaa lagu biirinayaa hantida Shirkadda mana la qaybinayo haddii aysan go'aan ku gaarin gudiga maamulka Shirkadada (Board of Directors).
3. Haddii ay jirto baahi isbalaarin ee Shirkadda faa'idada waxaa go'aaminaya guddiga Saamileyda in lagu kordhiyo raasumaalka iyo in loo qaybiyo Saamileyda Shirkadda.
4. Haddii khasaare ku yimaado Shirkadda, dhinacyada Saamileyda ah waxay bixinayaan Saamile kaste qaybta Saami kaga soo aada ee hantida uu shirkadda ku leeyahay.
5. Faa'do xisaabedka inta aan laqaybin waxaa laga goynayaa guno ama abaal marin ah oo dhan 20%, waxaana la siinayaa gudiga maamulka, shaqaalaha iyo ciddii shaqo wanaagsan u qabata Shirkadda.
6. Sakada waxaa laga bixinayaa faa'idada iyo raasumaalka Shirkadda marka la isku daro, lagana bixiyo dhamaan kharashaadka iyo daymaha Shirkadda waxaana bixinaya guddiga maamulka.

7. Saamile kasta waa in lasiiyo faa'dadiisa loona sheego meesha uu ka qaadanayo iyo waqtiga lasiinayo.

Qodobka 11'aad

QAAB-DHISMEEEDKA SHIRKADDA (FOUNDATION STRUCTURE)

Shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waxay ka kooban tahay saddex guddi oo kala ah sidaan:-

1. Golaha guud ee Shirkadda (Shareholders)
2. Guddiga Maamulka/Tashiga (Board of Directors)
3. Guddiga Fulinta (Operation team)

Qodobka 12'aad

GOLAHA GUUD EE SHIRKADDA

Golaha guud ee Shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waa hay'adda ugu sareysa Shirkadda, waxayna ka kooban tahay dhamaan Saamilayda Shirkadda, xilalka iyo awoodaha golaha guud waa sidaan hoos ku xusan:-

1. Ansixinta miisaaniyadda Shirkadda.
2. Ansixinta qorsha hawleedka Shirkadda.
3. Ansixinta dastuurka, xeerka iyo wax ka bedelkooda ee Shirkadda.
4. Ansixinta xubnaha cusub ee Shirkadda.

Qodobka 13'aad

GUDDIGA MAAMULKA/TASHIGA (BOARD OF DIRECTORS)

Guddiga maamulka Shirkadda waa hay'adda ugu sareysa maamulka Shirkadda, lehna awooda fulinta iyo isku dubaridka shaqo hawleedka Shirkadda waxayna ka kooban yihiin 5 xubnood, awoodaha iyo xilalka guddiga maamulka waa sidaan hoos ku xusanay:-

1. Dejinta qorshaha iyo siyaasadda guud ee Shirkadda.
2. Soojeedinta wax ka bedelka miisaamiyadda Shirkadda.
3. Ka doodida iyo meel marinta heshiisyada ay dhinaca ka tahay Shirkaddu.
4. Magacaabidda guddiga fulinta ee Shirkadda.
5. Xilalka (Gudomiye, Gudomiye Ku xigeen & Xubin)

Qodobka 14'aad

WAA JIBAADKA GUDDOOMIYAHA SHIRKADDA

Waa jibaadka guddoomiyaha Shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waa sidaan:-

1. In uu Saamilayda iskugu yeero xili xisaabedka iyo go'aan gaarista Saamiga cusub ee Shirkadda lagu kordhinayo.
2. In uu shir guddoomiyo shirarka guddiga maamulka Shirkadda.
3. In uu Shirkadda u matalo hay'adda dawladda.
4. In uu yeesho kormeeridda shaqada iyo habsami u socodka guud ee hawlaha Shirkadda.
5. In uu yeesho hubinta go'aamada guddiga maamulka iyo Saamilayda ee Shirkadda.
6. In uu saxiixo hawlaha iyo heshiisyada Shirkaddu ay la galayso cid kasta iyo hawl kasta oo danta Shirkaddu ku jirto.

Qodobka 15'aad

GUDDIGA FULINTA SHIRKADDA (OPERATION TEAM)

Guddiga fulinta ee Shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waa madaxda hawl wadeenada kuwaas oo ka kooban agaasimaha waaxda maamulaha iyo shaqaalaha hawlaha Shirkadda wada.

Qodobka 16'aad

KOORAMKA SHIRARKA SHIRKADDA

1. Shirka golaha guud ee Shirkadda kooramka ugu yar ee la isugu yeeri karo waa 3/5 shirka marka arrimaha laga hadlayo ay yihiin kuwo caadi ah.
2. Marka laga hadlayo arrimo muhiim ah sida:- Ansixinta xeerka iyo sharciga dhismaha Shirkadda iyo miisaaniyada wuxuu kooramka noqonayaa 3/5 saddex meelood laba meel ee xubnaha golayaasha Shirkadda.
3. Shirka guddiga maamulka iyo fulinta kooramka uu ku ansaxayo ee ugu yar waa 3/5 ee golaha maamulka & fulinta.

Qodobka 17'aad

GO'AAN GAARISTA HAWLAHA SHIRKADDA

go'aan gaarista guddiga guud ee Shirkadda wuxuu ku ansaxayaa 3/5 marka wax laga beddelayo dastuurka, xeerka iyo hantida Shirkadda inta kale go'aanka waxaa lagu gaarayaa cod hal dheeri ah.

Qodobka 18'aad

MIISAANIYADA IYO XISAAB XIRKA SHIRKADDA

Shirkadda J F HOBYO MAAL LTD waxay yeelanaysaa hal xisaab xir, xisab xirkaas waxaa uu dhacayaa bil dhamaadka 12kii biloodba mar sida (Dec, 31) ee sanad kaste waana controlka guud

ee waxqabatkii shirkadda loona soo gudbinayo guddiga maamulka Iyo dhamaan Saamileyda Shirkadda.

Qodobka 19'aad

KA BIXIDA SHIRKADDA

1. Saamile kasta waxaa ka reebban inuu Saami kala baxo Shirkadda sanad xisaabeedka koowaad ee ku xiga dhismaha Shirkada.
2. Saamile kasta ee raba inuu ka baxo Shirkadda, waa inuu qoraal ku soo codsadaa la bixidda Saamigiisa ugu yaraan saddex bilood ka hor xisaab xir sanadeedka.
3. Guddiga maamulka waa inuu go'aan ka gaara qaabka loo bixinayo iyo sida loo buuxinayo booska banaanaaday.
4. Hadii Saami lala baxayo ay ka badanyihiin 25% hantida Shirkadda waa in guddiga maamulka oo kaashanaya gudiga Guud go'aan ka gaaro sida loo kabayo ama wax looga baddelayo raasumaalka Shirkadda.
5. Hadii ay maxkamad saarto xayiraad hantida Saamile ka mid ah Shirkadda, maamulka waa inay go'aan ka gaaraan kasii mid noqoshada Shirkadda.

Qodobka 20'aad

GEERI AMA WAALI KU TIMID XUBIN KA MID AH SHAREHOLDERS-KA Shirkadda

1. Qofkii geeriyooda ee ka mid ah xubnaha Saamileyda waxa yeelanaya Saamigiisa dhaxaltooyadiisa, waxaase sharci ah inuu guddiga maamulka ogolaadaan xubnimadiisa Shirkadda.
2. Hadii waali ku timaado xubin ka mid ah Shirkadda waxaa Saamigiisa lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamada u amarto.

Qodobka 21'aad

BAABI'INTA SHIRKADDA

Waxay baaba'aysaa Shirkaddu marka la helo qodobada soo socda :-

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka Shirkadda.

2. Go'aan baabi'in ah ee ka soo baxay golaha guud.
3. Hadii shirkadu ay musalafto.
4. Hadii uu soo baxo sharci baabi'inaya Shirkaddaha noocaan ah.

Qodobka 22'aad

KALA QAYBSIGA HANTIDA SHIRKADA

Waxaa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida Shirkadda ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay Shirkadda iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruucda lagu dhisay Shirkadda.

Qodobka 23'aad

SHARCIGA IYO LUQADA HESHIISKA

1. Luqadaha heshiiska uu ku qoranyahay waxaa asal u ah luqadda af Soomaaliga.
2. Marjaca loo noqonayo waa dastuurka Shirkadda iyo qawaaniinta dalka u degsan ee mowduucaas nidaamiya.
3. Wixii fasiraad ah waxaa lala kaashanayaa dadka xirfadoodu tahay hawshaan.
4. Nuqulka Af-Soomaaliga oo ay saxiixeen xubnaha share-da oo dhan waxa lagu keydinayaa xafiiska xarunta Shirkadda iyo goobihii uu tilmaamay qaanuunka.

Qodobka 24'aad

WAXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Shirkadda waxaa loo raacayaa xeerka Shirkadda iyo sharciga Shirkaddaha ee dalka u degsan.

Qodobka 25'aad

DHAQAN GALKA SHARCIGA DHISMAHA

Sharciga dhismaha wuxuu dhaqangalayaa marka ay saxiixaan xubnaha gudoonka ee Shirkadda.

Qodobka 26'aad

TIRADA BOGAGA EE HESHIISKA KU QORANYAHAY

Heshiisgaan wuxuu ku qoran yahay Af-Soomaali wuxuuna ka kooban yahay Sagaal Bog.

Heshiisgaan waxaa ila saxiixay Aasaasayaasha Shirkadda, kadib markii ay akhristeen, raalina ay ka noqdeen sida aan u qornay heshiisgaan, waa kan saxiixyadooda hoos ku qoran:-

=SAXIIXYADDA MILKIILAYAASHA=

1. Abdulahi Said Salad (A. Jiis)



2- Elmi Mohamed Baalle



3-Qoje Mohamud Qeyliye



4-Ahmed Hassan Guled



5-Abdullahi Mohamed Dahir (Seed)



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.914/T.P.N/23, Tr. 18/12/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan in ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa 1-Abdulahi Said Salad (A. Jiis) 2-Elmi Mohamed Baalle 3-Qoje Mohamud Qeyliye, 4-Ahmed Hassan Guled, 5-Abdullahi Mohamed Dahir (Seed) Waxaan halkaan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha Sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay saxiixayn Milkiilayaasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay Magacyadooda in ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyada kor ku xusan, iyagoo Cuskanaysa Dukumintiga iyo Baasaboorada, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARAQADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD

L. Qaranka/ رقم الهوية / National ID

26901018729635



Magaca / الاسم / Name

AHMED

HASSAN GULED

Taariikhda dhalashada / الميلاد / Birth

01 Jan 1969

GALKAIO

Taariikhda la bixiyay / الاصدار / Issue

21 Dec 2021


MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo / الإنتهاء / Expiry

20 Dec 2026

Lab / Dheddig / الجنس / Gen

MALE




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 27/12/2023

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed Siyaad** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/laahi Maxamed Daahir (Seed)** Kana Mid ah Milkiilayaasha **Shirkada J F HOBYO MAAL LTD.** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 914/W.P.N/23, Tr. 18/12/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Shirkada J F HOBYO MAAL LTD
Taariikhda Caddeynta	18/12/2023

Cadeeye: Aniga oo ah **C/laahi Maxamed Daahir (Seed)**, Leh Tel No. **0615901652**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Shirkada J F HOBYO MAAL LTD.**



FG. Dukumintigaan Waxaan Gacanta Ka Saaray Seed Wuxuuna La Aaday W.Ganacsiga 3 jeer ayuu Ku Laalaabtay

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed Siyaad

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/laahi Maxamed Daahir (Seed)

Aoisa ayaa Siyeey